




WAXQABADKA

HAY'ADDA QAXOONTIGA IYO BARAKACAYAASHA QARANKA

Sannadka 4^{aad}

2021



01 CUTUBKA TAAD: MAAMULWANAAGA

02 CUTUBKA LABAAD BARAKACAYAASHA.

03 CUTUBKA SADDEXAAD: SOO-NOQDAYAASHA

04 CUTUBKA AFRAAD: QAXOONTIGA



HORDHAC

Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranka (HQBQ) waa Hay'ad Dawli ah oo lagu aasaasay Digreeto Madaxweyne January 2018-kii si loogu fidiyo Barakacayaasha, Qaxoontiga, Soo-noqdayaasha iyo Socotada taageero xagga ilaalinta iyo in xal waara loo raadiyo dhammaan Dadkaas kala duwan ee Qaxoontiga/Magangelyo-doonka, Barakacayaasha, Soo-noqoshada iyo Socotada Somaliland.

Sannadihii u Dambeeyey Aasaaska Hay'adda sida ku cad waajibaadkeeda waxay taageero siisay Dhammaan Barakacayaasha, Qaxoontiga/Magangelyo-doonka iyo Muwaadiniinta Waddanka dib ugu soo laabtay, iyo Socotada/Tahriibayaasha Somaliland.

Iyadoo ay Hay'addani ka Hawl-gasho dhammaan Gobollada Somaliland Sida Gobolka Maroodijeex, Togdheer, Awdal, Saaxil, Sanaag, Sool, Gabiley, Selel, Saraar, Daad-madheedh, Buhoodle, Baligubadle Iyo Badhan.

Buuggan waxa laga dheehanayaa dhammaan warbixinaha waxqabad ee Sannadka 2021 ee dhinacyada kala duwan sida Barakacayaasha, Qaxoontiga, Soo-noqdayaasha iyo Tahriibayaasha ama Socotada aan sharciga ahayn.

Haddaba Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranku waxa ay waddanka u qaabilsan tahay gargaarka Bini'aadamnimo sidoo kale waxa ay bixisaa adeegyo badan oo aasaasi ah, Waxa Buuggan ku xusan Mashaariic laga fuliyay dhammaan Gobollada Dalka iyada oo wax laga qabtay baahiyaha dadka jilicsan ee Hay'addu ay u xilsaarantahay.

Ugu danbayn Buuggan waxa loogu talagalay in laga xigto Warbixin kasta oo ku saabsan Waxqabadka Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranka ee Sannadka 2021.



REPUBLIC OF SOMALILAND
NATIONAL DISPLACEMENT & REFUGEE AGENCY
(NDRA)


JAMHUURIYADDA SOMALILAND
HAY'ADDA QAXOONTIGA IYO BARAKACAYAASHA QARANKA
(HQBQ)

**QAAB-DHISMEEDKA HAY'ADDA
AGENCY STRUCTURE**

CHAIRMAN

Vice Chairman

Technical Advisors



QAAB-DHISMEEDKA HAY'ADDA QAXOONTIGA IYO BARAKACAYAASHA QARANKA (HQBQ)

MAHADNAQ

Mahad dhamaanteed waxa iska leh allaha weyn ee suurta geliyey in uu soo baxo buuggan oo koobsanaya warbixinaha wax-qabad ee sannadka 2021 ee dhammaan dhinacyada kala duwan sida Barakacayaasha, Qaxoontiga, Soo-noqdayaasha iyo tahriibayaasha ama socotada aan sharciga ahyn.

Waxa aan u mahad naqayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland oo hagaya siyaasadda guud ee Qaranka, iyo gacanta joogtada ah ee uu u fidiyo HQBQ.

Intaa ka dib Guddoomiyaha Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland waxa uu u mahadnaqayaa masuuliyiinta Hay'adda iyo cid kasta oo ay wada shaqeeyeen sannadkaas 2021 sida Hay'adaha dawlaga ah Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Wasaaradda Hawlaha Guud, Wasaaradda Qorshaynta Qaranka, Wasaaradda Horumarinta Waxbarashadda, Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka, Hay'adda Xuquuqal Insaanka Qaranka, Hay'adda Shaqaalaha Dawladda, Dhammaan Dawladaha hoose ee Dalka, Ciidamadda kala duwan sida Ciidanka Booliska, Ciidanka Socdaalka, Ciidanka Ilaalada Xebaha iyo Guddoomiyayaasha Gobollada iyo Hay'adaha Qaramada Midoobay u qaabilsan Qaxoontiga iyo Socdaalka Adduunka ee UNHCR, IOM, iyo Hay'adaha Caalamiga ah iyo kuwa maxalliga ah sida KSA, NDR, DRC, World Vision, ACTED, CARE International, Taakulo iyo kuwa kal ee aanan halkan ku xusin

Ugu danbayn Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland oo hagaya siyaasadda guud ee qaranka iyo hiigsiga guud 2030.

Allaa Mahad leh

Cabdikariim Axmed Maxamed

Guddoomiyaha Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranka

TUSMADA BUUGGA

HOR-DHACA BUUGGA
HIIGSIGA FOG.
HORDHAC

i
iii

1. CUTUBKA 1AAD: MAAMULWANAAGA

1

1.1.1 HORUMARINTA SHAQAALAHA.	2
1.1.2. Xil-Gudashada Shaqaalaha Hay'adda Qaxoontiga Iyo Barakacayaasha Qaranka.	5
1.1.3. Gaadiidka Fududaynaaya In ay Shaqada yimaadaan Shaqaaluhu:-	5
1.1.4. Horumarinta Cududda Shaqaalaha	6
1.1.5. Kobicinta Tababarrada Xirafadaha Shaqaalaha HQBQ ee Sanadka 2021	6
1.1.6. Qalabka iyo Xafiisyada ay Shaqadu ka socoto :-	8
1.1.7. Horumarinta Qaab-Dhismeedka Hay'adda	10
1.1.7.2. Qaab-dhismeedka Cusub ee Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranka.	10
1.1.8. Qiimaynta Hawl-qabadka Shaqaalaha	11
1.1.9. Iyadoo ay sunne u tahay HQBQ in sannad kasta ay dhiirigeliyaan shaqaalaha	12
1.2.1. Diiwaangelinta 79 Shaqaalaha HQBQ ee Diiwaanka guud ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.	12
1.2.2 Dhamaystirka Shaqo Qeexista Shaqaalaha Hay'adda Qaxoontiga & Barakacayaasha	13
1.2.3. Diyaarinta Qorshaha Samaynta ID-cards Shaqaalaha HQBQ	13
1.2.4. Bed-qabka iyo Caafimaadka Shaqaalaha	14
1.2.5. Diyaarinta Qorshaha Shanta sanno ee Hay'adda	15
1.2.6. Kulannada Iyo Shirarka Kale .	15
1.2.7 Kulankii Guddomiyaha iyo Ergayga Geeska Africa u Qaabilsan Hay'adda UNHCR	15
1.2.8 Kulankii Guddomiyaha iyo Madaxa Cusub ee xafiiska UNHCR Somaliland	16
1.2.9 Kulankii Guddomiyaha Iyo Madaxa Hay'adda UNHCR ee Somaliland iyo Somaliya	16
1.3.1 Kulankii Guddomiyaha iyo Hay'adda Adduunka u qaabilsan Socdaalka ee IOM.	17
1.3.2 Ka Qayb galka Kulamada Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 2aad (NDP 2)	18
1.3.3 Horumarinta Nidaamka Tiknoolojiyada	19
1.3.4. Website	19
1.3.5.Dhismayaasha Horumarinta Xafiisyada Iyo Dayactirka Gaadiidka Hay'adda	20

2. CUTUBKA LABAAD. BARAKACAYAASHA.

22

2.1.1. Adeegyadda laga fuliyey Kaamamka Barakacayaasha oo Faah-faahsan.	27
2.1 Adeegyada Cuntada iyo Agabka aan Cuntada Ahayn	27
2.1.2 Alaabooyinka aan Cuntada Ahayn (NFI)	27
2.1.3 Kaalmo Lacageed:	28
2.1.4 Shirarka Alaabooyinka aan cuntada	28
2.1.5 Dhulka iyo Hoyga (Land and Shelter)	28
2.2.1. Dhulk	28
2.1.5.2. Hoyga:	29
2.1.6. Kormeerka iyo ka warhaynta Mashaariicda la xidhiidha Dhulka iyo Hoyga.	29
2.1.7. Hirgelinta Mashaariicda Xalka Waara (Durable Solutions).	30
2.1.8. Xirfad & Ganacsi:	30

2.1.9. Goobaha ciyaaraha:	30
2.2. 2.2. Dhismayaasha Suuliyada:	31
2.2.1. Adeegga Biyaha Kaamamka Barakacayaasha	31
2.2.2. Qaybinta Taangiyada Biyaha:-	32
2.2.3. Dhismaha Sariibadda Kaamka Barakacayaasha Qalax:-	32
2.2.4 : Adeegyada Caafimaadka:	33
2.2.5 : Horumarinta Guddiyada Kaamamka Barakacayaasha.	33
2.2.5.1 Tababarrada	33
2.2.6 Dhismaha xarunta Iftiinka Qoraxda ee Salaxley	34
2.2.7 Wacyi-gelinta Covid-19 iyo Tacadiga Jinsiga ee Kaamamka Baraka- cayaasha Dalka.	34
2.2.8 Dhismaha Xafiisyada Guddiyada Kaamamka Barakacayaasha	34
2.2.9 Qiimeynta Mashaariicda Xidhiidhka Kaamamka	35
2.3 Qiimeynta Xaaladda Guud ee Barakacayaasha	35

3.CUTUBKA SADDEXAAD: SOO-NOQDAYAASHA

37

3.1 Soo-Noqdayaasha	37
3.1.1. Soo-Noqdayaasha laga Soo Celiyey Waddanka Yemen ee ka Soo Degay Dekadda Berbera.	37
3.1.2. Tirada Guud ee Soo-noqdaayaasha kala ah (AVVR,AVRR JI & ASR) ee Sannadka 2021	38
3.1.3. Adeegyada Dib-udajinta ee ay heleen Soo-noqdayaashu.	39
3.1.4. Tirada Soo-noqdayaasha ee Tababarro iyo Xirfado helay.	39
3.1.5. Tirada Dhallinyarada heshay Lacagta.	40
3.1.6. Tirada Dhallinyarada Heshay Maal-gelin Ganacsi.	41
3.1.7 Tahriibka iyo ka jawaabida Socotada (Migration Response Center -MRC)	42
3.1.8 Caafimaadka loo fidiyey Socotada ku nool Hargeysa ee soo dalbaday	42
3.1.9 Diiwaangelinta loo sameeyey Socotada ee soo dalbada in Dalkoodii dib loogu celiyo	43
3.2.1 Wacyigelinta Dhibaataada Tahriibta ee Dalka	44
3.2.2 Dib u Celinta Muhaajrinta ku sugan Somaliland (AVR)	45
3.2.3. Ka Ganacsiga Dadka iyo Ku Shaqaysiga Qasabka ah	45
3.2.4 Ilaalinta Xuquuqda Caruurta Qaybta Wacyi-Gelinta Muhajiriinta.	46

4. CUTUBKA AFRAAD: QAXOONTIGA

48

4.1 Diiwaangelinta Qaxoontiga iyo Magange- lyo- doonka.	48
4.2.1 Kaadhahka Qaxoontiga iyo Shahaadooyinka Magangelyo doonka)	49
4.2.2. Nidaamka Xog-keydiyaha Casriga ah ee ProGres Version 4	51
4.2.3. Taakulada Dadka Qaxoontiga iyo Magangelyo-doonka	52
4.2.4 Raashin Qaybintii Qaxoontiga Carabta ah ee ku sugan Dalka.	52
4.2.5 Kormeerka Xuduudaha ee ay samaysay Waaxda Qaxoontigu	55
4.2.6 Doorashooyinka Guddida Qaxoontiga ee HECCA iyo MENA	56
4.2.7 Shirka Hay'adaha Dawladda ee wada Shaqeynta la leh HQBQ:	56
4.2.8 Diyaarintii Xeerka Qaxoontiga JSL.	57
4.2.9 Faa'iidooyinka sharcigani uu u leeyahay Qaranka.	58

CUTUBKA TAAD: MAAMULWANAAGA



HORUMARINTA SHAQAALAHA.

1.1.1 HORUMARINTA SHAQAALAHA.

Hay'adda Qaxoontiga Iyo Barakacayaasha Qaranku Waxay u xil-saarantahay inay abuurto jawi ay u riyaaqaan dhammaan Shaqaalaha Hay'addu iyo saamaynta ay Shaqadooda ku leedahay in la gaadho Hiigsiga iyo Himilada Shaqo ee HQBQ, iyadoo loo maraayo nidaamka maaraynta Hawl-qabadka Shaqaalaha oo ku salaysan Hannaanka Qorshaynta, Maaraynta iyo qiimaynta Hawlqabadka Shaqaalaha iwm.

Warbixinitan waa nuqul kooban oo ka turjumaya warbixin ka bilaabmaysa January ilaa Dec 2021 ee Horumarinta Cududda Shaqaalaha.

1. Horumarinta Shaqaalaha
2. Qiimaynta hawl-qabadka Shaqaalaha
3. Maamulka Shaqaalaha
4. Shaqaalaysiinta, Iyo Dalacsiinta Shaqaalaha
5. Bad-qabka iyo Caafimaadka Shaqaalaha



Faah-faahinta shaxda Guud ee shaqaalaha HQBQ.

S/N	Darajada Shaqaalaha	Tirada Darajada	Tirada Labka ah	Tirada Dheddig ah
1	A	136	82	54
2	B	29	22	7
3	C	21	11	10
4	D	24	13	11
Wadarta Guud		210	128	82

Shaxda Heerka Aqoonta Shaqaalaha Hay'adda Qaxoontiga Iyo Barakacayaasha Qaranka

S/N	Aqoonta	Xarunta	Lab	Dhedig	Gobollada	Lab	Dhedig	Tirada Guud
	Master Degree	7	5	2	0	0	0	7
	Bachelor Degree	77	53	24	42	25	17	119
	Diploma	3	0	3	0	0	0	3
	Secondary /Certificate	27	19	5	12	4	8	39
	Primary /Informal	19	9	10	23	9	14	42
	Isugaynta Guud							210

Heerka Aqoonta Shaqaalaha Hay'adda Qaxoontiga Iyo Barakacayaasha Qaranka




Aqoonta	Xarunta	Lab	Dhedig	Gobollada	Lab _1	Dhedig _2	Tirada Guud
Bachelor Degree	77	53	24	42	25	17	119
Diploma	3	0	3	0	0	0	3
Isugaynta Guud							210
Master Degree	7	5	2	0	0	0	7
Primary /Informal	19	9	10	23	9	14	42
Secondary /Certificate	27	19	5	12	4	8	39
Total	130	86	44	77	38	29	330

SHAXDA GUUD AHAAN SHAQAALAHA KA HAWL-GALA HAY'ADDA QAXOONTIGA IYO BARAKACAYAASHA QARANKA

XOGTA SHAQAALHA HAY'ADDA QAXOONTIGA & BARAKACAYAASHA QARANKA																
No	Gobolka	T-G Shaqaabaha	Male	Female	Grade A	M-G- A	F-G- A	Grade B	M-G-B	F-M-B	Grade C	M-G-C	F-G-C	Grade D	M-G-D	F-G-D
1	Xarunta	140	87	53	92	56	36	19	17	2	18	9	9	11	5	6
2	Gabiley	8	4	4	3	0	3	0	0	0	1	1	0	3	2	1
3	Awdal	6	5	1	3	3	0	1	1	0	0	0	0	2	1	1
4	Salel	1	1	0	1	1	0	0	0	0	0	0	0	0	0	0
5	Saaxil	9	8	1	7	6	1	1	1	0	0	0	0	1	1	0
6	Daad-madheedh	2	2	0	1	1	0	1	1	0	0	0	0	0	0	0
7	Togdheer	19	13	6	14	10	4	2	1	1	1	1	0	2	1	1
8	Saraar	6	4	2	3	2	1	0	0	0	0	0	0	3	2	1
9	Sanaag	8	5	3	4	3	1	2	0	2	1	1	0	2	1	1
10	Sool	9	2	7	9	2	7	0	0	0	0	0	0	0	0	0
11	Buuhoodle	1	1	0	0	0	0	1	1	0	0	0	0	0	0	0
12	Hawd	1	1	0	0	0	0	0	1	0	0	0	0	0	0	0

Jaantuska Tirada Shaqaalaha oo Gobollaysan



1.1.2. Xil-Gudashada Shaqaalaha Hay'adda Qaxoontiga Iyo Barakacayaasha Qaranka.

Iyadoo Sannadkan dhammaanaya ee 2021 ay Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranku ay ku tallaabsatay Horumar aad u ballaadhan oo uu ku hogaaminaayey Guddoomiyaha HQBQ waxa si dhab ah uga hana-qaday hannaanka maamul wanaagga iyo isla-xisaabtanka iyadoo la raacayo nidaamka maaraynta iyo qorshaynta hawl-qabadka Shaqaalaha (Performance Management) isla-markaana loo hirgeliyey Shaqaalaha Hay'adda baahiyaha aasaasiga ah ee ka caawinaayey inay gaadhaan Hiigsiga iyo Himilada ay Hay'addu lahayd sanadkaasi Sida :-

1.1.3. Gaadiidka Fududaynaaya In ay Shaqada yimaadaan Shaqaaluhu:-

Iyadoo Qof kasta oo Shaqaalaha Hay'adda ka tirsan laga soo qaado gurigiisa lana geeyo marka uu Shaqada ka baxo, Arrintaasi oo fududaysay in dhammaan Shaqaalaha Hay'addu ay si habsami ah u gutaan waajibaadkooda Shaqo korna u qaadday wax soosaarkii Shaqaalaha Hay'adda, wax weynna ka tartay in Saacadaha Shaqo ee Qaranka loo Shaqaynayaa ay noqdaan qaar sidii Sharciga Shaqaaluhu Waajibinaayey sii dhammaystiraan, maadaama oo ay Shaqaalaha Hay'addu Shaqada soo galaan inta u dhaxaysa 06:30Am ilaa 7:00 am .

Waxaa kale oo iyana Hay'adda ka hano qaaday isla-xisaabtan dhammaystiran oo Shaqaalaha lagula xisaabtamayo Saacadaha Shaqada iyo Waajibaadkooda Shaqo labadaba, waxaanay taasi keentay in Sannadkan dhammaan Shaqaalaha HQBQ ku hawlgalaan Qorshayaal Shakhsi ah (Indivitual Workplan) oo laga soo dheegay Qorshe Hawleedka Waaxdiisa taasi oo fududaysay isla-xisaabtankii Shaqada.



1.1.4 Horumarinta Cududda Shaqaalaha

Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranku iyadoo fulinaysa Siyaasadaha u adeega Shaqaalaha Dawladda ee fursadaha u siinaaya in shaqaaluhu ay kordhiyaan aqoontooda iyo xirfadooda shaqo Waxay hay'addu sannadkan xilweyn iska saartay sidii loo kobcin lahaa aqoonta shaqaalaha Hay'adda waxaanay qabatay **21-Tababar** oo ay qaateen dhammaan Shaqaalaha kala duwan ee Hay'addu tababarradaasi oo si weyn wax uga taray inay fulaan Qorshayaashii ay lahaayeen dhammaan Waaxaha Hay'addu, waxayna ku salaysnaayeen Qiimayntii iyo Qorshihii baahiyaha tababar ee ay Waaxda Cududda Shaqaaluhu samaysay sannadka bilowgiisii loogana gol lahaa in kor loogu qaado xirfadda iyo Aqoonta Shaqaalaha HQBQ.

1.1.5 Kobcinta Tababarrada Xirfadaha Shaqaalaha HQBQ ee Sanadka 2021

Hay'addu iyada oo ka duulaysa in kor loo qaado Xirfadda iyo Aqoonta Shaqaalaha HQBQ si loo helo adeeg tayaysan oo ay helaan Dadka nugul ee ay Hay'addani u adeegto waxay samaysay Tababarro kala duwan oo ay qaateen dhammaan Shaqaalaha, Isuduwaayasha iyo Agaasime waxeedyada Hay'addu, Tababaradaasi oo khuseeyey Shaqada Waaxyaha Hay'adda. Waxa kale oo ay Shaqaaluhu ka sinnaayeen Tababarrada guud ee kor loogu qaadayo Xirfadahooda Shaqo kuwaasi oo khuseeyey Taabbogalinta iyo Tayaynta Shaqada Hay'adda. Iyada oo 329-Shaqaale ahi ay ka faa'iidaysteen Tababarradaasi.





1.1.6 Qalabka iyo Xafiisyada ay Shaqadu ka socoto :-

Sannadkan Waxaa u suurto galay Hay'adda in ay kor u qaaddo dhammaan Qalabka ay ku shaqaynayaan Shaqaalaha Hay'addu sida laptops cusub oo la keenay ,Computers cusub oo lagu qalabeeyey dhammaan Xafiisyada Waaxaha iyo Qaybaha kala duwan ee xarunta Hay'adda iyo Gobolladaba, halka dayactir

ballaadhan lagu sameeyey Dhismayaasha Hay'adda Qaar cusubna la dhagax dhigay oo hadda Gabo-gabo ku dhaw, kuwaasi oo si weyn uga qayb qaatay kor u kaca shaqo ee Hay'adda iyo Gaadhista Yoolkii ay lahayd.



Qalabaynta Cusub ee xafiisyada Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranka.

S/N	Nooca Tababarka	Training	Tirada
1.	Ilaalinta Xaquuqda Muhaajiriinta	Protection of immigrants	7 -Shaqaaale ah
2.	Sharciiga Qaxoontiga	Refugee law training.	1 -Shaqaaale ah
3.	Qiimaynta & Daba-galka	Monitoring and Evaluation	29-Shaqaaale ah
4.	Cilmiga Arimaha Bulshada	Social work training	41 -Shaqaaale ah
5.	Cafimaadka Guud	Occupational health(Covid 19)	22 -Shaqaaale ah
6.	Latalinta Dadka Isku Buuqay	psychosocial counseling	32 -Shaqaaale ah
7.	Luuqada Ingiriisida	Advanced English course	25 -Shaqaaale ah
8.	Nidaamka Mushahar Samaynta	payroll Management system	1 -Shaqaaale ah
9.	Barashada Cilimiga Tignolajiyada	(ICT)	1 -Shaqaaale ah
10.	Xal u Helida Nolol Waarta ee Dadka Nugul	Durable solutions For IDPs	3 -Shaqaaale ah
11.	Ilaalinta Xaquuqda Caruurta	Child protection	15 -Shaqaaale ah
12.	hab-qoraalka tolmoon ee af-soomaliga	Somali Language	66 -Shaqaaale ah
13.	Qiimaynta Hawl-qabadka Shaqaalaha	Performance Training	38 -Shaqaaale ah
14.	Tababarka Ilaalinta Xaquuqda Barakacayaasha iyo Sugida Xogtooda	IDPs protection	3 -Shaqaaale ah
15.	Tababarka Xeerka Anshaxa Shaqaalaha Dawladda	CSC Disiplinary Law	2 -Shaqaaale ah
16.	Tababarka Ilaalinta xuquuqda Barakacayaasha	IDPs Protection	3 -Shaqaaale ah
18.	Tababarka Horumarinta Cududda Shaqaalaha(HRM)	HR- Pakage Training	1 -Shaqaaale ah
19.	Tababarka Data-baseka Soo-noqdayaasha	Returnees Data Base	10
20.	Tababarka Barashada Xuquuqada Qaxoontiga iyo Wajibaadka Guud ee HQBQ	Refugees law and NDRA Mandate Training	13-Isuduwe
21.	Tababarka Diwaangelinta Qaxoontiga iyo Magan-galyo Doonka	Progress version Four Training	16-Shaqaaale ah



1.1.7. HORUMARINTA QAAB-DHISMEEDKA HAY'ADDA

Sannadkan 2021 waxaa Hay'adda HQBQ ku soo kordhay Hal Waax oo cusub taasi oo ku timi qiimayn ballaadhan oo lagu sameeyey masuuliyadaha iyo xil-gudashada Waaxyaha iyo Qaybaha kala duwan ee Hay'adda waxaa ka soo baxay in baahi weyn loo qabo waaxdaas oo ah **Waaxda Protectionka** kana dhigtay tiradii waaxyaha Haya'dda 9-Waaxood.

in baahi weyn loo qabo waaxdaas oo ah **Waaxda Protectionka** kana dhigtay tiradii waaxyaha Haya'dda 9-Waaxood.

1.1.7.2. Qaab-dhismeedka Cusub ee Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranka.



Hay'adda Qaxoontiga Iyo Barakacayaasha Qaranku Waxay ka kooban tahay:-

- A. **9-Waxood (Departments)**
- B. **33-Qaybood (Sections)**
- C. **13-Gobol oo ay ku leedahay Isu-duwayaal (Regional Co-ordinators).**

Waaxyahaasi oo kala ah:-

1. **Waaxda Cududda Shaqaalaha**
2. **Waaxda Maamulka iyo Maaliyadda**
3. **Waaxda Qorshaynta iyo Tirikoobka**
4. **Waaxda Barakacayaasha**
5. **Waaxda Qaxoontiga iyo Magangelyo-doonka**
6. **Waaxda Soo-noqdayaasha iyo Socotada**
7. **Waaxda Xidhiidka Gobollada**
8. **Waaxda Tiknolajiyada.**
9. **Waaxda Protectionka(Ilaalinta Xuquuqaha)**

1.1.8. Qiimaynta Hawl-qabadka Shaqaalaha

Waaxda Cududda Shaqaalaha ee HQBQ sannadkan 2021 waxay si toos ah u dhaqangelisay 16-Habraac oo ay Hay'adda shaqaalaha Dawladdu soo saartay kuna Tababartay Waaxda Cududda Shaqaalaha HQBQ, Haddaba Waaxdu iyadoo raacaysa Habraacyadaasi waxay qiimayn ku samaysay Dhammaan shaqaalaha HQBQ kuwaasi oo iskugu jiray dhammaan Derajooyinka Shaqaalaha, Qiimayntaasi oo loo gudbiyey Hay'adda Shaqaalaha Dawladda JSL, iyadoo bilowgii sannadka la dhaqangeliyey Meertada Maaraynta Hawl- qabadka Shaqaalaha Hay'adda oo ka bilaabmaysey in Waax weliba ay diyaariso Qorshe -sannadeedka ay ku hawl-gelayso (Departmental Work-plan) oo ay ka soo dheegatay qorshaha guud ee HQBQ,(Organizational Strategic plan) ka dibna laga sii diyaariyey Qorshaha Shaqaalaha (Individual Workplan) kaasi oo loo



gudbiyey Hay'adda Shaqaalaha Dawladda, waxa kale oo dib u eegis lagu sameeyey dhammaan Qorshayaasha Waaxaha Hay'adda (Midterm Review) iyada oo la isla-eegay wixii qabsoomay iyo caqabadaha jirayba.

iyadoo ugu Dambayntiina ay Hirgashay Qiimaynta Hawl-qabadka Shaqaalaha HQBQ, qiimeeyey dhammaan Shaqaalaha iyada oo la raacayo Hab-raacyadii Hay'adda Shaqaalaha Dawladda JSL waxaana diyaar ah Xafladda Abaal-marinta Shaqaalaha Hay'adda, Sidoo kale Sannadkan Waaxda Cududda Shaqaalahu waxay ku tallaabsatay Horumar weyn oo dhinaca Maamulka Shaqaalaha HQBQ, iyada oo la raacaayo Qorshihii Sannadka ee ku salaysnaa Qorshaynta Shaqada iyo Hawl-qabadka Shaqaalaha waaxdu waxay Sannadkan door-weyn ka qaadatay hagidda iyo gacansiinta Shaqaalaha taasi oo suurto gelisay in Horumar weyn laga gaadhay Hiigsigii HQBQ, waxayna Sannadkan kor u qaaday Habka Diiwaanka Faylasha Shaqaalaha Hay'adda iyada oo Qof kasta oo Shaqaale ah loo sameeyey tixraac u gaar ah oo lagu aqoonsado, waxa kale oo ay waaxda samaysay Sannadkan kormeerro joogto ah oo ay ku hubinaysay habsami u socodka hawl-gudashada Shaqaalaha si loo sugo habsami u socodka Shaqada waaxdu waxay dedaal weyn u gashay ilaalinta Saacadaha Shaqo ee Shaqaalaha Hay'adda iyada oo si maalinle ah ula socota Shaqada guud ee Shaqaalaha Hay'adda, Arrintaasi oo ay fududaysay nidaamka casriga ah ee Finger-printka xaadiriska Shaqaalaha, isla-markaana waxay waaxdu u gudbisay Gudidda anshax taasi oo anshax-marin ku samaysay Shaqaale kala duwan oo ay ku caddaatay inay jabiyeen Xeerka Shaqaalaha Dawladda iyada oo loo raacay anshax marintooda Xeerka Shaqaalaha Dawladda JSL Xeer No/7/1996.

1.1.9. Shaqaalaysiinta, Beddelka Iyo Dalacsiinta Shaqaalaha

iyada oo ay sunne u tahay HQBQ in Sannad kasta ay dhiirri-geliso Shaqaalaha HQBQ ee sameeya dedaalka ay aqoontooda kor ugu qaadayaan, waxa Sannadkan dallacay 10-Qof oo ka mid Shaqaalaha HQBQ kuwaasi oo ku dallacay Aqoontooda iyo waayo-aragnimadooda derajadooduna tahay sida tan:-

S/N	Darajada	B To A	C to B	D to C	Wadarta Guud
1.		3	3	4	12

Waxaa kale oo Sannadkan la Shaqaalaysiiyey oo si rasmi ah Diiwaanka Shaqaalaha Dawladda u galay 19-Qof oo ahaa Shaqaalihii ku meel-gaadhka ahaa oo ka tirsanaa Hay'adda, Waxa kale oo iyana Sannadkan dallacay xil ahaan Shaqaale kala duwan oo u dallacay xilalka Madax qaybeedyo iyo Agaasime Waaxeedyo iyadoo Guddomiyaha Hay'addu ku dhiirgelinaayey Shaqaalaha Hay'adda.

Shaxda Shaqaalaha Cusub ee Ku Soo Biiray Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha

S/N	Darajada	A	B	C	D	Wadarta Guud
1.		5	3	2	9	19

1.2.1 Diiwaangelinta 79 Shaqaalaha HQBQ ee Diiwaanka guud ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.

- Waxa la diiwaangeliyey 79-xubnood oo ka mid ah Shaqaalaha HQBQ ee aanay hore u suurto gelin in ay ka qayb noqdaan Diiwaanka guud ee Shaqaalaha Dawladda (CSC server) kuwaas oo iskugu jira shaqaale ku meel gaadh ah iyo Shaqaale aan hore u marin Diiwaangelinta Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.
- Waxa Xafiiska waaxda cudduda Shaqaaluhu la wadaagay faylashoodii Xarunta archive-yada ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda,




Sawirrada Diwaangelinta Hay'adda Shaqaalaha ee Shaqaalaha HQBQ

Sidoo kale Waaxda Cududda Shaqaaluhu Waxay la wadaagtay Hay'adda Shaqaalaha Dawladda Jsl Dhammaan Faylasha Shaqaalaha HQBQ kaasi oo noqonaaya xogta lagu kaydin doono Archive-yada Guud ee Qaranka.

1.2.2 Dhamaystirka Shaqo Qeexista Shaqaalaha Hay'adda Qaxoontiga & Barakacayaasha

Hay'addu waxay Sannadkan ku guulaysatay in la diyaariyo Shaqo Qeexista Shaqaalaha Hay'adda kaasi oo suurto-gelinaya in Qof kasta oo Shaqaale ahi uu yeesho Shaqo qeexis cad oo lagula xisaabtami doono ,iyadoo dhammaan 9-ka waaxood iyo 33-ka Qaybood ee Hay'addu ay ka kooban tahay loo dhammaystiray Shaqo Qeexistoodii oo ka turjumaysa Shaqada iyo Waajibaadka Qaran ee loo igmaday.



1.2.3. Diyaarinta Qorshaha Samaynta ID-cards Shaqaalaha HQBQ.

Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranka waxay iyadoo raacaysa nidaamka isla-xisaabtanka Shaqaalaha waxay u diyaarisay dhammaan Shaqaalaha Kaadhka Aqoonsiga oo u gaar ah si loogu aqoonsado, iyadoo Sannadkan ay HQBQ u Diyaarisay Shaqaale Tiradoodu Dhan tahay 40-Qof Kaadhka Aqoonsiga Shaqaalaha.



1.2.4. Bed-qabka iyo Caafimaadka Shaqaalaha

Iyadoo Sannadkan ay ahayd Sannadkii labaad ee uu Adduunka oo dhan ka dillaacay Xanuunka safmarka ah ee Covid-19 kaasi oo saamayn ku yeeshay habsami u socodka Shaqo ee Shaqaalaha Dawladda, isla-markaana sababay in Shaqaalahu ay fasax galaan Laba bilood iyadoo la raacayo tilmaamahii Guddida heer qaran ee Covid 19. Hay'addu iyadoo og muhiimadda uu bed-qabka Shaqaalahu HQBQ u leeyahay Shaqada waxay qaadeen tallaabooyin hor leh oo lagaga hortagayo xanuunkaas.

Waxa la tallaalay dhammaan Shaqaalaha HQBQ iyada oo kaashanaysa wasaaradda Horumarinta Caafimaadka JSL, sidoo kalena waxa markiiba hirgalay Nidaamka Farxalka, waxa kale oo iyana la joojiyey finger print- ka xaadiriska Shaqaalaha iyadoo guud ahaan Shaqaalaha la faray in ay ka taxadaraan xanuunkaasi lana siiyey talooyin wax ku ool ah iyo Wacyi-gelin ku filan.



Sawirada Muujinayaa Taxadarkii laga galay Covid19 ee Xarunta Hay'adda Qaxoontiga & Barakacayaasha

1.2.5 Diyaarinta Qorshaha Shanta sanno ee Hay'adda

Asaaskii Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranka ka dib Hay'adda Waxay Samaysay Qorshe 3-Sano ahaa oo ku dhamaaday Sanadkan 2021, Haddaba Hay'addu iyadoo og muhiimadda uu leeyahay in Qorshe cusub ay yeelato, waxay bilawday diyaarinta Qorshaha Hay'adda ee shanta Sano ee soo socda oo ka bilaabmaaya 2022- ilaa 2026 oo ah muddo Shan Sano ah.



1.2.6 KULANNADA IYO SHIRARKA KALE .

1.2.7 Kulankii Guddomiyaha iyo Ergayga Geeska Africa u Qaabilsan Hay'adda UNHCR

Guddoomiyaha Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranka ayaa kulan kula qaaday Xafiiskiisa wefti sare oo ka socda Hay'adda UNHCR, weftigaasi oo uu hoggaaminayo Ergayga Geeska Afrika uqaabilsan Hay'addaas Amb Maxamed Cabdi Afey.

Ujeeddada kulankan ayaa daarranaa sidii loo meelayn lahaa Qoxoontiga tirada badan ee ku sugan gudaha Jamhuuriyadda Somaliland iyo samaynta Xeryo Qoxoonti oo lagu hayo Dadka ay Somaliland u aqoonsantahay Qaxoontiga. Wuxuuna ku soo dhammaaday Jawi is-afgarad ah oo labada dhinac ay isku fahmeen.



1.2.8 Kulankii Guddomiyaha iyo Madaxa Cusub ee xafiiska UNHCR Somaliland

Sidoo kale Hay'adda Qaxoontiga Iyo Barakacayaasha ayaa Sannadkan kulan la qaadatay Wefti Ballaadhan oo uu hogaaminayay Madaxa cusub ee Soomaliland iyo Soomaaliya ee Hay'adda Qaxoontiga Adduunka ee UNHCR.

Ujeeddada kulankan oo ahayd is barasho iyo is xogwaraysi ku saabsan xaaladda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha ku sugan Jamhuuriyadda Somaliland.

kulankan ayaa waxa ay Guddoomiyaha iyo masuuliyiinta ka socday Hay'adda UNHCR diiradda ku saareen Qodobadan.

- In sharciga Qaxoontiga hore loo dhammaystiro.
- In lagu daro Qaxoontiga, Barakacayaasha iyo Soo-noqdayaasha. Qorshaha Horumarinta Qaranka ee Saddexaad ee socda.
- In Arrimaha la xidhiidha mustaafurinta lagala hadlo laanta socdaaalka Qaranka.
- In guryo loo dhiso qoysas kamid ah Dadka Barakacayaasha ah ee ku kaamka Naasa-hablood C.
- In Hay'adda UNHCR ka qayb qaadato samaynta strategy-yadda labaad ee Hay'adda Qaxoontiga & Barakacayaasha Qaranka.



1.2.9 Kulankii Guddomiyaha Iyo Madaxa Hay'adda UNHCR ee Somaliland iyo Somaliya

Guddoomiyaha Hay'adda Qaxoontiga Iyo Barakacayaasha Qaranka Md C/kariin Axmed Maxamed (Xinnif) ayaa xafiiskiisa Kulan kula qaatay Wefti ballaadhan oo uu hogaaminayay madaxa cusub ee Soomaliland iyo Soomaaliya ee Hay'adda Qaxoontiga Adduunka ee UNHCR.

Ujeeddada kulankan oo ahayd is barasho iyo is xogwaraysi ku saabsan xaaladda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha ku sugan Jamahuuriyada Somaliland. Kulankaasi oo ay Guddomiyaha ku weheliyaayeen La taliyayaasha Hay'addu waxa uu ku soo dhammaaday jawi wanaagsan oo masuuliyiintu ay isku af-garteen in si dhaw looga wada Shaqeeyo taakulaynta Qaxoontiga ku nool Somaaliland.



1.3.1 Kulankii Guddomiyaha iyo Hay'adda Adduunka u qaabilsan Socdaalka ee IOM.

Madaxda Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranku waxay kulan la qaateen wafti uu horkacaayo madaxa ugu sareeya Hay'adda socdaalka u qaabilsan Adduunka. kulankan oo Ujeeddadiisu Ahayd sii xoojinta wada Shaqaynta dhinaca Socdaalka iyo soo celinta muwaadiniinta reer Somaliland ee ku dhibaataysan Waddamada dibadda isla mar ahaantaana ku xayirmay ee aan awoodin in ay soo noqdaan, ugu danbayn weftiga ka socday Hay'adda Socdaalka u qaabilsan Qaramada Midoobay ee IOM iyo Madaxda HQBQ waxa ay isku-afgarteen sidii loo dar-dargelin lahaa xidhiidhka wada Shaqayneed ee labada Hay'adood.



1.3.2 Ka Qayb galka Kulamada Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 2aad (NDP 2)

Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaashu waxay si joogta ah uga qayb tahay dhammaan kulannada Qorshaha hurumarinta Qaranka ee Hay'adaha Dawliga ah iyo deeq bixiyayaasha Caalamiga ah oo lagaga doodayay waxqabadkii Qorshihii Horumarinta Qaranka ee Labaad NDP 2 iyo sidii loogu diyaar garoobi lahaa Qorshaha Horumarinta Qaranka ee 3aad.




1.3.3 Horumarinta Nidaamka Tiknoolojiyada

Hay'addu waxa ay Sannadkan gudihiisa kala soo wareegtay Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolojiyada JSL official Emails cusub, Emailadaasi oo loogu talo galay in ay ku hawlgalaan Sagaalka(9) Waaxood ee Hay'adda, Guddoomiyaha iyo guddoomiye ku xigeenka, kuwaasi oo lagu sii wareejiyay waax walba Emailka ay ku hawlgeli lahayd, isla markaana lagu Tababarray Agaasime waaxeed kasta sida loo isticmaalayo Email-kaas Dawliga ah.

1.3.4 Website

Sannadkan 2021ka waxa ay Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaashu yeelatay website cusub oo laga heli karo xogo badan oo ku saabsan waxa ay Hay'addu u taagantahay isla markaana si maalinle ah loogu guro Macluumaad (Daily update), website-ka oo ah kan: 'https://ndra.gosomaliland.org' kaasi oo si buuxda hawada ugu jira.



1.3.5.Dhismayaasha, Horumarinta Xafisyada Iyo Dayactirka Gaadiidka Hay'adda

Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaash Qaranka waxa loo dhisanay Dhismaha cusub oo loogu talagalay in Hay'addu ku Shaqayso taas oo laga maalgeliyey Miisaaniyadda Qaranka.



- Waxa dayactir lagu Sameeyey dhammaan Gaadiidka Hay'adda oo Tiradoodu dhantahay 15 Gaadhi.
- Waxa Qalabayn lagu sameeyey Saddex Xafiis oo kala ah kuwa xarunta iyo Xafiiska Gobolka Gabiley.
- Hay'addu waxa ay diiwaangalisay dhammaan Hantida guurta iyo Maguurtada ah oo aanu ku diiwaangelinay Habka nidaamka maamulidda Maaliyadda iyo xogta (Somaliland Financial Management Information System)
- Waxa Sannadkan Hay'adda loo iibiyey Laba Gaadhi oo NOAH ah.



2. CUTUBKA LABAAD BARAKACAYAASHA.



2. CUTUBKA LABAAD BARAKACAYAASHA.

Barakacayaasha waxa u qabsoomay Sannadka 2021 mashaariic badan oo la gaadhsiiyey dadka Barakacayaasha ah kuwaas oo ku jiray Qorshaha ku talo-galka Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranka iyada oo Hay'addu Gaadhay Hiigsiga Qorshe Sannadeedkii 2021.


Haddaba, Sannadkan 2021 Waxaa Mashaariic Tiro badan la gaadhsiiyey Barakacayaasha ku sugan dhammaan Gobollada Jamhuuriyada Somaliland, kuwaas ku nool 228 Kaam oo Dalka oo dhan ah Sidoo kale Tirada guud ee Barakacayaasha gudaha Somaliland waa 92,888 Qoys oo u dhiganta 557,328 Qof. Iyadoo Bulshada Somaliland ku nool lagu qiyaaso 5.7 Milyan Tirakoobkii u danbeeyey ee ay soo saartay Wasaaradda Arrimaha Dibada Somaliland waxay ka noqonayaan 10.2 % (boqolkiiba toban dhibic laba) marka loo eego Bulshada Somaliland ku nool.

1. Tirada Kaamamka Barakacayaasha Dalka 228 Kaam
2. Tirada Guud Qoysaska ee Barakacayaasha 92,888 Qoys
3. Tirada Guud Qofeed ee Barakacayaasha 557,328 Qof

Xogta Barakacayaasha Dhammaan Gobollada Dalka




Xogta Gobollada



Tirada Qoysaska
92,888

Tirada Qofeed
557,328



GOBOLLADA	TIRADA QOYSASKA	TIRADA QOFEED	BOQOLLAY
Awdal	9,877	59,242	0.10
Marodjeh	21,442	128,652	0.23
Sahil	5,365	32,790	0.06
Sanag	8,865	51,940	0.10
Sool	9,877	59,242	0.11
Togdher	37,162	227,456	0.40
Total	92,888	557,328	0.46

S/N	Magaca Mashruuca	Tirada ka faaidaystayaasha	Ujeeddada Mashruuca	Goobta Mashruuca	Gobolka	Goorta dhammaaday
1	KAALMO LACAGEED OO CADDAAH AH	12,828 qoys	kasoo kabashada Barakacayaasha ee Xanuunka Safmarka ah ee Covid 19	Aden Saleeban, Ali Hussein, Aqil Yare, Alla Amin, Guryo Samo , Koosar, Mandheera iyo Naaso Hablood C	Togdheer, maroodi-Jeex iyo Saaxil	31-Dec-21
2	WACYI-GALINTA CUDURKA COVID-19	500 Qoys	kor u qaadida aqoonta iyo fahanka Bulshada Barkacayaa sha ah ee Xanuunka Faafa ee Covid 19	Naaso Hablood A,B, C and Mooge B	Maroodi Jeex	31-Dec-21
3	DHISMAHA KAYD BIYOOD WAYN	1,373 Qoys	in la helo biyo kaydiye	Barakaca Qalax	Maroodi Jeex	Nov-21
4	TABABARKA GUDDIYADA BARAKACAYAASHA	76 xubnood	kor u qaadida xirfadda hogaamint	Hargeisa	Maroodi Jeex	Oct-21
5	KAALMO RAASHIN AH	26,703 qoys	kasoo kabashada Barakacayaasha ee Xanuunka Saf marka ah ee Covid 19	Hargeisa, Burao, caynabo, Mandheera	Maroodi Jeex, Togdheer, Saaxil iyo Saraar	Dec-21
6	DHISMAHA GAROON CARUURTA BARAKACAYAASHA AHI KU CIYAARTO	Carruur Barakacayaal ah	ka hortaga isticmaalka Maandooriyaha iyo dambiyada	Naaso Hablood C	Maroodi Jeex	November second week 2021

7	ABUURISTA ISKAASHATOYINKA IYADOO LOO SAMEEYEV MAALGELIN GANACSIYO YAR YAR	263 Dumar ah	kor u qaadida wax-wada qabsiga ganacsiga	Qalax and Malawle IDP, Mooge A, Mooge B, Naaso Hablood A., Digaale, Xayir Cali, 18 may, Aalla Amin iyo Mandheera	Maroodi Jeex, Togdhe er iyo Saaxil	Nov-21
8	LA WAREEGID GAADHI BOOYAD AH	1,373 Qoys	in la helo Booyad biyood loogu addeego dadka Barakacaya asha ah dhanka biyaha	Barakaca Qalax	Maroodi Jeex	Nov-21
9	SUULIYO LA DHISAY	219 Qoys	in kor loo qaado caafimadka iyo nadaafadda dadka Barakacaya asha ah	Naaso Hablood C iyo Qalax	Maroodi Jeex	Dec-21
10	GURYO LA DHISAY IYO QAAR LA DAYACTIRAY	339 Qoys	in dadka Barakacaya asha ah loo helo hoy ay ku noolaadaan	Naaso Hablood C iyo Magaalo Cad	Maroodi Jeex iyo Saaxil	Dec-21
11	ALAABOYINKA AAN CUNTADA AHAYN EE LA QAYBIYEV	3,307 qoys	ka tageerida dadka Barkacayaa sha ah dhanka macuunka iyo huga	Laascanood, Hargeisa, Ceel afweyn, Burco, Caynabo iyo Gargaara	SOOL, Sanaag , Maroodi Jeex, Togdheer, Awdal iyo Saraar	Dec-21
12	TABABAR XIRFADEED	203 Dhalinyaro Barakacayaal ah.	in dhalinyarad a Barkacayaa sha ah la baro xirfad aqooneed ay ku shaqo tagaan	Qalax, Digaale, malawle, Ayax 1,2,3 & 4, Mooge A, Mooge B, State House iyo Naaso hablood A,B & C	Maroodi Jeex	Dec-21

1 3	TAANGI BIYOODYO LA QAYBIYAY	401 qoys	in la helo weel biyood	Qalax	Maroodi Jeex	Sep-21
1 4	BIYO DHAAMIS	1,373 qoys	in la helo biyo degdeg ah oo dadka loo qaybiyo	Qalax	maroodi Jeex	Dec-21
1 5	IFTIIMINTA KAAMAMKA	3,000 qoys	in helo iftiin guryaha lagu isticimaalo	Ceel Afweyn, Shimbiraale, Markabka, Dararwayne, Fiqifuliye, bali mataan iyo Bali Gubadle	Sanaag, Hawd iyo Maroodi Jeex	Dec-21
1 6	DIB U DEJIN	128 qoys	in la helo dhul rasmiya oo ay dadku ku nooladaan	18 may c, Burco.	Togdheer	Mar-21
1 7	CEEL BIYOOD LA QODAY	1,500 qoys	in la soo saaro biyaha dhulka	Mandheera	Saaxil	Nov-21
1 8	ADDEEG CAAFIMAD OO INDHAHA AH	102 Qof	In ay helaan daryeel caafimaad.	Hargeisa	Maroodi Jeex	febraury 2021
1 9	TIRADA SHIRARKA BILLAHA AH EE LA QABTAY	33 Shir	Habka fogaan aragga ayaa lagu qabtay	Maroodi jeex	Maroodi jeex	Dec 2021
2 0	Qiimeyn Guud oo xaalada barakacayaasha ah (DTM)	Barakacayaas ha dalka oo dhan	20 degmo doorasho oo dalka ah	Gobollada dalka oo dhan	Gobollada dalka oo dhan	Dec 2021

2 1	Qiimeynta dabagalka mashaariicda iyo	Barakacayaas ha gobollada dalka oo dhan ee laga fuliyey mashaariicda	Qiimeynta iyo Dabagalka mashaariicda socday	Barakacayaas ha gobollada dalka oo dhan ee laga fuliyey mashaariicda	Barakacayaa sha gobollada dalka oo dhan ee laga fuliyey mashaariicda	Dec 2021
2 2	DHISMAHA SARIIBADDA QALAX	1,373 QOYS	In kor loo qaado adeegyada asaasiga ah ee dadka barakacayaasha ah.	Kaamka Qalax ee Hargeysa	Maroodi jeex	Dec 2021
2 3	DHISMAHA KEYDKA BIYAHA EE QALAX	1,373 QOYS	In kor loo qaado keydka biyood ee kaamka	Kaamka Qalax ee Hargeysa	Maroodi jeex	Dec 2021
2 4	DHISMAHA KEYDKA IFTIINKA QORAXDA EE SALAXLEY	550 QOYS	In kor loo qaado adeega iftiiminta kaamka	Kaamka Salaxley ee Hargeysa	Maroodi jeex	Dec 2021
2 5	DHISMAHA XAFIISKA GUDIDDA KAAMKA SALAXLEY	Gudidda iyo kaamka guud ahaan	In kor loo qaado wada shaqaynta xubnaha gudidda iyo kaamka	Kaamka Salaxley	Maroodi jeex	Dec 2021

2.1.1. Adeegyadda laga fuliyey Kaamamka Barakacayaasha oo Faah-faahsan.

2.1 Adeegyada Cuntada iyo Agabka aan Cuntada Ahayn

2.1.1 Raashin:

Dadka Barakacayaasha ah ee Raashin qaybin loo sameeyay Sannadka 2021 waxa ay dhamaayeen tiro ahaan 26,703 Qoys oo ku kala Sugan dhammaan Goboladda. Raashinkaasi waxa uu si hufan u wada gaadhay Dadka nugul ee ay Hay'addani u adeegto ee ku sugan kaamamka Barakacayaasha Dalka.



2.1.2 Alaabooyinka aan Cuntada Ahayn (NFI)

Hay'addu waxay Sannadkan 2021 u qaybisay Barakacayaasha Maryo, Jirikaamo, Weel ay Cuntada ku karsadaan, Bustayaal ay dhaxanta ka huwadaan iyo Taangiyo Biyaha ay ku kaydsadaan kuwaas oo la gaadhsiiyay 3,307 qoys oo Barakacayaal ah, si ay uga caawiso sidii ay u heli lahaayeen Agabka aan Cuntada ahayn kaas oo sahlaya hab nololeedka Qoysas kaas.



2.1.3 Kaalmo Lacageed:

Hay'adda Qaxoontiga Iyo Barakacayaasha Qaranku iyada oo kaashanaysa Hay'adaha ay Wada Shaqaynta leeyihiin Waxay Sannadkan kaalmo lacageed oo Bille ah gaadhsiisey 12,828 Qoys, taasi oo Qoys walba la siiyey \$80.



2.1.4 Shirarka Alaabooyinka aan Cuntada ahayn.

Hay'addu waxa ay qabatay Shirar ka kooban 11 (Kow iyo Toban), kuwaasi oo lagaga hadlayey Arrimaha khuseeya Alaabooyinka aan Cuntada ahayn iyo sidii dhammaan Barakacayaasha Ku nool kaamamka Dalku ay u heli lahaayeen Alaabaha aan cuntada Ahayn, shirarkan oo ahaa qaar Bille ah waxaa guddominayey Waaxda Barakacayaasha iyadoo ay ka soo qayb galaan daneeyayaasha wada Shaqaynta la leh HQBQ.

2.1.5. Dhulka iyo Hoyga (Land and Shelter)

2.2.1 Dhulka:

Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranku Sannadka 2021-ka waxa ay ku guulaysatay in dhul la siiyo Dadka Barakacayaasha ahi ay iska leeyihiin si ay u helaan waxyaabaha nolasha aasaaska u ah sida Waxbarashada, Caafimaadka iwm. Waxa la siiyey dhul ay leeyihiin 128 Qoys, Qoysaskaasi oo laga raray dhul Dad shacab ahi ay leeyihiin.



2.1.5.2. Hoyga:

Sannadka 2021 Waxaa kaamka Barakacayaasha ee Naaso-hablood C laga fuliyey Dhismaha 53 Guri oo loo dhisay Dadka Barakacayaasha ah, kuwaas oo Sannadkii hore laga soo raray Waddada 150-ka iyo Suuqa Xisbiga. Sidoo kale waxa dib loogu dayactiray 286 Guri Qoysaska deggan kaamamka Barakacayaasha Gobolka Saaxil Arrintaasi oo looga gol lahaa sidii Dadka Barakacayaasha ah loogu helo Hoy ay ku noolaadaan.



2.1.6. Kormeerka iyo ka warhaynta Mashaariicda la xidhiidha Dhulka iyo Hoyga.

Waaxda Barakacayaashu iyada oo gudanaysa waajibaadkeeda Shaqo ee la xidhiidha Mashaariicda Hoyga iyo Dhulka waxa ay sameysay kormeer Sannadle ah oo ay ugu kuur gelayso wax ka qabashada Arrimaha Hoyga iyo Dhulka.



2.1.7. Hirgelinta Mashaariicda Xalka Waara (Durable Solutions).

2.1.8. Xirfad & Ganacsi:

Hay'addu iyadoo ka duulaysa sidii Bulshada nugul ee ku nool Kaamamka Barakacayaashu ay u gaadhi lahaayeen isku fillaansho buuxa waxay bartay Xirfado ay ku Shaqaystaan 203 dhalinyaro ah oo ku nool Kaamamka Barakacayaasha Maxamed Mooge A, Maxamed Mooge B, Naasahablood A, Naasahablood B, Naasahablood C, Digaale, Jimcaale, Statehouse, Stadium, Ayax 4 iyo Ayax 3, Xirfadahaasi oo ay ku Shaqaysan karaan, waxaana iska kaashaday HQBQ, Machadka Guusha, Machadka Tababarka Xirfadaha ee Hargeysa, NRC, CDG iyo Taakulo. Waxa kale oo 263 Haween ah oo ku nool kaamamka Barakacayaasha Dalka loo sameeyey Iskaashatooyin Ganacsi oo ay ku Shaqaystaan.



2.1.9. Goobaha ciyaaraha:

Hay'addu iyada oo ka duulaysa ahmiyada ay ciyaaruhu u leeyihiin dhalinyarada ku sugan kaamamka Barakacayaasha, waxa ay horumarin ku samaysay dhalinyarada kala duwan ee ku nool kaamamka Barakacayaasha Dalka, iyadoo u diyaarisay Garoomo ay ku ciyaaraan oo ay kaga mashquulaan Balwadaha iyo Dembiyada xilliyada ay fasaxa ka yihiin Waxbarashada.

Waxaana loo hirgaliyey Garoomo Kubbadda Cagta ah iyo Goobo Carruurto ku ciyaarto, Mashaariicdaasi oo ay iska kaashadeen Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranka iyo Hay'adda SOS ujeeddada laga leeyahayna tahay in dhallinyarada Barakacayaasha la soo gaadhsiiyo aqoon ahaan iyo Caafimaad ahaanba dhallinyarada kale ee reer Somaliland.



2.2. 2.2. Dhismayaasha Suuliyada:

Si kor loogu qaado Fayo-dhawrka Kaamamka Barakacayaasha Dalka waxa loo hirgeliyey 219 Suuli oo laga dhisay kaamamka Barakacayaasha Naaso hablood C iyo Qalax, kuwaasi oo wax weyn ka taray Caafimaadka guud ee kaamamka laga hirgeliyey.

Waxa hirgelinta Suuliyadan gacan weyn ka geystay Daneeyeyaasha Barakacayaasha ee ay Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranka wada Shaqaynta leeyihiin.



2.2.1. Adeegga Biyaha Kaamamka Barakacayaasha

Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranku iyadoo ahmiyad weyn siinaysa Ka jawaabidda xaaladaha Biyo la'aaneed ee ka jirta kamaamka Barakacayaasha guud ahaan Waddanka, waxay Gobolka Saaxil ka hirgalisay Ceel-biyood ay ka faa'iidaystaan 1,500 oo Qoys. Waxa kale oo Biyo dhaamin loo sameeyey 19,000 Qoys oo ku nool dhammaan Kaamamka Barakacayaasha Dalka oo ay haleeshay Biyo la'aan darani, Sidoo kale Waxay isna laga dhisay Kaamka Barakacayaasha Qalax Kayd-biyood weyn oo ay ka faa'iidaystaan 1,373 Qoys. iyadoo isla Sannadkan ay Hay'addu iyadoo kaashanaysa Hay'adaha ay wada Shaqaynta leeyihiin ay u iibisay Kaamamka Barakacayaasha Maroodi-jeex Gaadhi Booyad ah oo u dhaamin doona Kaamamkaasi.



2.2.2. Qaybinta Taangiyada Biyaha:-

Sannadkan 2021 HQBQ Waxay u Qaybisay Taangiyo Biyood **401 qoys** oo ku sugan dhammaan Kaamamka Barakacayaasha Dalka, Taangiyadaasi oo loogu talagalay in ay wax weyn ka taraan Baahida Weel la'aanta ah ee ay qabeen kaamamka Barakacayaashu waxaana laga qaybiyey kaamamkii loo qorsheeyey.



2.2.3. Dhismaha Sariibadda Kaamka Barakacayaasha Qalax:-

Si kor loogu qaado adeegyada ay helaan Dadka nugul ee ku nool Kaamka Barakacayaasha Qalax oo ahaa Dadka laga raray xarumaha Ciidanka Qaranka ee Birjeex, Hay'addu iyadoo kaashanaysa Hay'adda Acted waxay ka hirgalisay kaamka Barakacayaasha ee Qalax Sariibad oo hadda maraysa meel gabo-gabo ah.



2.2.4 : Adeegyada Caafimaadka:

Caafimaadku waxa uu ka mid yahay baahiyaha aasaasiga ah ee ay u baahan yihiin Bulshada Barakacayaasha ahi, sidaasi darteed kormeerradii xog-ogaal u noqoshada xaaladda Barakacayaasha ee ay samaysay Hay'addu waxa ka soo baxay Dad tiro badan oo ku nool kaamamkaasi ay u baahan yihiin adeeg Caafimaad oo dhinaca Indhaha ah, sidaasi darteed Hay'addu iyadoo kaashanaysa Cisbitaalka Manhal waxay qalliin dhinaca Indhaha ah u samaysay 102 Qof oo ahaa Dadka aragoodu daciifay.



2.2.5 Horumarinta Guddiyada Kaamamka Barakacayaasha.

2.2.5.1 Tababarrada

Sannadka 2021ka waxa tabobarro lasiiyey Guddiyada Kaamamka Barakacayaasha si ay u fududaato habsami u socodka u gargaarista Dadka Barakacayaasha ah, iyadoo ay Hay'addu awoodda saartay isku xidhka kaamamka iyo Guddiyadda taasi oo kor loogu qaadaayo xirfadooda iyo aqoontooda, waxa Sannadkan la tababaray 76 Guddi oo ka kala socday Kaamam kala duwan oo ku yaalla Maroodi jeex, Hawd, Sanaag, Togdheer, Daad madheedh, Saraar iyo Buhoodle.



2.2.6 Dhismaha xarunta Iftiinka Qoraxda ee Salaxley

Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranka iyada oo kaashanaysa Daneeyeyaasha Barakacayaasha waxa ay ka dhistay keydka iftiinka Qoraxda oo laga hirgeliyey Kaamka Barakacayaasha ee Salaxley.

2.2.7 Wacyi-gelinta Covid-19 iyo Tacadiga Jinsiga ee Kaamamka Baraka- cayaasha Dalka.

Maadaama lagu jiro xilli uu Dunida halis ku hayo xanuunka Covid-19, waxa ay Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranku iyada oo kaashanaysa Daneeyeyaasha Barakacayaasha ay sameysay wacyi-gelin joogta ah oo ku saabsan ka hortagga iyo la tacaalidda Xanuunka safmarka ah ee Covid-19 waxa ayna ka samaysay kaamamka Barakacayaasha ee Dalka iyada oo loogu gudbinaayo fariimaha Hab Maqal iyo Muuqaalba ah, Waxa kale oo ay Hay'addu wacyi-gelin joogta ka sameysay dhinacyada tacaddiga jinsiga oo Sannadkan 2021 la gaadhay 3,000 oo Qof oo ku nool Kaamamka Barakacayaasha ee Somaliland.

2.2.8 Dhismaha Xafisyada Guddiyada Kaamamka Barakacayaasha

Hay'addu iyada oo kaashanaysa daneeyeyaasha Arrimaha maamulka kaamamka Barakacayaasha waxa ay Sannadka 2021 ka hirgelisay 1-hal Xafiis oo Daar ah oo loo dhisay loona qalabeeyey Guddida Kaamamka Barakacayaasha Degmada Salaxley oo baahi wayn u qabay Xafiiskan oo ku jiray Qorshaha Hay'adda ee lagu Horumarinaayo Guddiyada Kaamamka Barakacayaasha Dalka.



2.2.9 Qiimeynta Mashaariicda Xidhiidhka Kaamamka

Hay'addu waxa ay ku sameysay qiimeyn Mashaariicda Horumarineed ee ka socday kaamamka Barakacayaasha Dalka iyada oo kooxo u kala diray Gobollada si ay u soo qiimeeyaan Mashaariicdaasi.



2.3 Qiimeynta Xaaladda Guud ee Barakacayaasha

Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranku waxa ay Sannadka 2021 u kala dirtay Shaqaale ka kooban 17 kooxood kuwaas oo qaadayey xogta guud ee xaaladda Barakacayaasha Dalka, si loo ogaado xaaladda nololeed ee ay ku sugan yihiin Dadka Barakacayaasha ahi si loogu go'aan qaato mudnaanta baahiyeed ee ay qabaan.



Sawirada Soo-noqdayaashii Ka Soo Noqday Yemen

3. CUTUBKA SADDEXAAD: SOO-NOQDAYAASHA



3. CUTUBKA SADDEXAAD:SOO-NOQDAYAASHA

Waxda Soo-noqdaayasha Iyo Tahriibka Hay'adda Qaxoontiga Iyo Barakacayaasha Qaranka Waxay ka kooban tahay Saddex Qaybood (Section) oo kala ah

- o **Soo-noqdayaasha**
- o **Dib-udajinta**
- o **Tahriibka (Wacyigelinta Muhaajiriinta)**

3.1 Soo-Noqdayaasha

Hay'addu Waxay u xil saarantahay Arrimaha Dadka Soo-noqdayaasha ah ee reer Somaliland ee ku nool Waddanka dibeddiisa isla-markaana ku dhibaataysan Waddamada ay ku nool yihiin una baahan inay Waddankooda ku soo-noqdaan soona dalbaday in Waddankooda si nabadgelyo ah loogu soo celiyo kuwaasi oo u badan Muwaadiniin ku nool Dalalka colaadaha iyo Dagaalladu ka qarxeen iyo Dhallinyarada u Tahriibtay Dalalka shisheeye sida Yemen,Suuriya,Suudan,Libiya iyo dhammaan dalalka kale ee Dunida.

3.1.1 : Soo-Noqdayaasha laga Soo Celiyey Waddanka Yemen ee ka Soo Degay Dekadda Berbera.

Sannadkan 2021 waxaa Dalka Somaliland soo gaadhay **3-doonyood** oo siday Soo-noqdayaal ay Hay'adda Qaxoontiga & Barakacayaasha Qaranku Ku soo Dhawaysay Xarunteeda Berbera kuna Diiwaangelisay. Soo-noqdayaashan oo loo kala qaaday goobahii ay u socdeen, iyadoo Sannadkan 2021 uu Adduunka ka dhacay Xanuunka Covid-19 kaasi oo sababay in la hakiyo dhammaan socdaaladii Adduunka, waxa uu saamayn weyn ku yeeshay isku socodka Maraakiibta soo qaadi jirtay Soo-noqdayaashii yemen taasi oo sababtay in Tiro aad uga yar tii Sannadkii hore ay yimaaddaan.

Soo-noqdayaashan ka yimid Dalka Yemen waxay Tiradoodu dhantahay 30-Qof kuwaas oo si nabad-gelyo ah ku soo gaadhay Dalka.



3.1.2 Tirada Guud ee Soo-noqdaayaasha kala ah (AVRR,AVRR JI & ASR) ee Sannadka 2021

Guud ahaan Tirada Soo-noqdaayaasha Sannadka 2021 ee ay Diiwaangelisay Hay'adda Qaxoontiga Iyo Barakacayaasha Qaranka JSL Waxay Dhanyihiin **66 Qof** oo ka soo noqday Yurub, Austrelia,Africa iyo Asia

Iyadoo Sannadkan uu dhacay xanuunka Covid-19 kaasi oo hoos udhigay dhammaan isu socodkii adduunka oo dhan.

Shaxda dadka Soo-noqdaayaasha iyo waddamaday ka yimaadeen

faah-faahinta xogta soo-noqdaayaashii Sannadka 2021

Country	Total of Returnees 2021												Total	Category
	January	February	March	April	May	June	July	August	September	October	November	December		
Yemen		16						8	5			1	30	ASR
Libya												22	22	AVRR-JI
Germany	1							1				1	3	AVRR
Greece												1	1	AVRR
Niger													0	AVRR
Finland				1									1	AVRR
Austria					2	2						1	5	AVRR(JI)
Egypt						2							2	AVRR
Norway												1	1	AVRR
Malta		1											1	AVRR
													0	AVRR
Total	1	17	0	1	2	4	0	9	5	0	27	0	66	



Sawirada Soo-noqdaayaashii laga soo celiyey Libya

3.1.3. Adeegyada Dib-udajinta ee ay heleen Soo-noqdayaashu.

Hay'addu waxa ay u xilsaarantahay sidii Dadka Soo-noqdayaasha ah looga taageeri lahaa in loo sameeyo Dibu-dejin, iyadoo loo samaynayo adeegyo kala duwan sida:- Waxbarashada, Caafimaadka, Tababar-xirfadeediyo iyo Maaligelin ganacsi, Haddaba adeegyada loo fidiyey Soo-noqdayaasha oo faahfaahsan waxaad ka arki doontaa shaxda hoose.

Shaxda Noocyada Adeegyada ay Heleen Soo-Noqdayaashu.

Sannadkan 2021 waxa la Hirgelisay iyadoo la kaashanaayo Daneeyayaasha ay wada Shaqayntu ka dhaxayso Hay'adda sida (UNHCR & IOM), waxay fuliyeen Mashaariicdan ku cad Jantuska hoos ku xusan:-

S/N	Noocyada Adeegyada Lagu caawiyey Soo-Noqdayaasha	Tirada
1.	Tirada dhalinyarada heshay tababar xirfadaha ah	175-qof
2.	Tirada Dhalinyarada heshay lacagta dib-udajinta	80-qof
3.	Tirada Dhalinyarada heshay Maal-gelin Ganacsi	95-qof
4.	Tirada Soo-noqdayaasha La siiyey Raashin	180 qof
Wadarta guud		530-qof

3.1.4. Tirada Soo-noqdayaasha ee Tabarro iyo Xirfado helay.

Waxa xirfado kala duwan lasiiyey Soo-noqdayaal dhan 175 Qof kuwaasi oo ka koobnaa Dhallinyaradii laga soo celiyey waddamada **Liibiya iyo Yemen**, Xirfadaha lasiiyey waxa kamid ah: - Barashada Dawaarka, Biyo-gelinta, cunto Karinta, Qurxinta Dumarka iyo Laydhka.



3.1.5 Tirada Dhallinyarada heshay Lacagta.

Sannadkan Hay'addu iyadoo Kaashanaysa Hay'adaha ay Wada Shaqaynta leeyihiin Waxay Siisay Dhallinyaro dhan 80 Soo-noqde lacagtii Dib-u-dejinta oo dhammayd \$2000 Qofkiiba taas oo loogu tala galay in dib u dajin loogu sameeyo, iyada oo lagu saleeyey Barnaamujyadii Ganacsi ee ay soo gudbisteen, Waxa kale oo iyana la siiyey dhallinyaradan lacag Bille ah oo ay qaadanaayeen lixdii Bilood ee u horaysay imitaankooda oo Bil walba la siinaayey \$200 si ay ugu daboolaan baahiyahooda asaasiga ah.



Sawirada dhalinyarada la siiyey lacagtii dib u dajinta

3.1.6 Tirada Dhallinyarada Heshay Maal-gelin Ganacsi.

Sannadkan 2021 Hay'adda Qaxoontiga Iyo Barakacayaasha Qaranka iyo Hay'adda NRC Waxa ay Maal- gelin ganacsi u sameeyeen 95 Qof oo isugu jira dhallinyaradii laga soo celiyey Liibiya iyo Soo-noqdayaal ka yimi Yemen kuwaasi oo loo furay meherado Ganacsi



3.1.7 Tahriibka iyo ka jawaabida Socotada (Migration Response Center -MRC)

Hay'addu waxa ay bixisa adeegyo kala duwan taasi oo ay ka faaiidaystaan Dadka Socotada ah (Muhaajiriinta) ee ku nool Dalka Somaliland waxaana ka mid ah Diiwaan-gelin, Daaweyn, Wacyi-gelin, dib-ucelin aan khasab ahayn, latalin, sidoo kale waxa la siiyaa waxyaabaha Cuntada ah (Food Items), iyo waliba in la siiyo Agab kala duwan oo aan Cunto ahayn (NFI).

- **Shaxda Guud ee Adeegyada loo qabtay muhaajiriinta socotada ah**

Diwaangalin	Caafimaad	Latalin	Adeega telefoonka	Wacyigalinta Tahriibta Outreach awareness	Muhaajiriinta lagu celiyey dalkoodii	(NFI)	Ilaalada caruurta
1,694	3,341	500	332	7,061	68	400	770
Wadarta guud = 14,166 socoto ah ayaa adeeg loo qabtay qaybta tahriibta ee waaxda Soo-Noqdayaasha.							

3.1.8 Caafimaadka loo fidiyey Socotada ku nool Hargeysa ee soo dalbaday

Waaxda Soo-noqdayaasha qaybteeda wacyigalinta muhaajiriintu waxay adeeg caafimaad oo lacag la'aan ah u fidiyeen dadka socotada/tahriibayaasha ee kunool magaalada Hargeysa ee soo dalbada in Dalkoodii dib loogu celiyo, adeegyadaas caafimaad oo iskugu jira adeegyo kooban oo xarunta Lagu Fuliyo wixii kale ee dheeraad ah ee aanay xaruntu awoodin (Critical cases) loo gudbiyo dhakhtarada waawayn ee gobollada sida Cusbitaalka weyn ee Hargeysa si xaaladdooda Caafimaad loogula tacaalo isla markaana ay uga helaan baadhitaannada iyo adeegyada Caafimaad ee ay u baahdaan looguna daaweeyo, waxaana iska kaashada HQBQ iyo Hay'adda IOM, waxaana adeegga Caafimaad ka faaiidaysatay 3,341 oo socoto ah.

Bilaha	Rag waaweyn	Dumar waweyn	Inamo yaryar	Hablo yaryar	Total
January	6	201	95	83	385
February	12	134	57	46	249
March	7	92	59	47	205
April	3	68	23	25	119
May	1	167	46	49	263
June	7	152	56	67	282
July	8	196	57	40	301
August	19	225	62	45	351
September	9	72	22	19	122
October	12	90	63	59	224
Nov	29	241	120	115	505
December	20	159	63	93	335
Total	133	1,797	723	688	3,341



3.1.9 Diiwaangelinta loo sameeyey Socotada ee soo dalbada in Dalkoodii dib loogu celiyo.

Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranku waxay Diiwaangelin u samaysay Muhaajiriin si iskood ah u soo dalbaday in ay Xafiska iska Diiwaangeliyaan oo tiradoodu dhammayd 1,694-Qof



Bilaha	Rag waaweyn	Dumar waweyn	Inamo yaryar	Hablo yaryar	Total
January	6	14	14	15	49
February	7	8	6	10	31
March	3	6	8	8	25
April	2	9	10	14	35
May	8	13	12	18	51
June	3	11	11	15	40
July	8	17	13	13	51
August	5	12	8	11	36
September	3	17	9	12	41
October	5	14	6	13	38
Nov	4	30	7	11	52
December	24	15	6	6	51
Total	78	329	110	146	500



3.2.1 Wacyigelinta Dhibaata Tahriibta ee Dalka

Hay'adda Qaxoontiga Iyo Barakacayaasha Qaranku Qaybteeda wacyigelinta Tahriibtu Waxay Sannadkan wacyigelin ku saabsan dhibaatooyinka laga dhaxlo Tahriibta gaadhsiyeen dhallinyarada Somaliland iyo muhaajiriinta ku nool Waddanka Sannadkan 2021 waxa wacyi-gelintaas la gaadhsiyeey dhammaan Gobollada Dalka JSL iyadoo xoogga la saarayey meelaha xuduudaha ah waxaanu Sannadkan gaadhnay oo wacyigelintaasi loo sameeyey **7,061Qof** oo ka mid ah Bulshada qaybaheeda kala duwan sida: - Ardayda Dugsiyadda ku jira kuwa Jaamacadaha Dalka, Kaamamka Barakacayaasha, Guddiyada Xaafadaha, Qaxoontiga ku nool Waddanka iyo Muhaajiriinta Waddanka ku dhex nool.



3.2.2 Dib u Celinta Muhaajrinta ku sugan Somaliland (AVR)

Hay'adda Qaxoontiga Iyo Barakacayaasha Qaranku Waxay Sannadkan Diiwangelin u samaysay Muhaajiriin(Socotada) badan oo dalbaday si iskood ah in Dalkoodii dib loogu celiyo, balse Sannadkan iyadoo uu Adduunkoo dhan ka dhacay Xanuunkii Covid-19 ee saf-marka ahaa waxa uu caqabad ku keenay nidaamka isu socodka Adduunka, waxaana Sannadkan 2021 Hay'add ahaan noo suuro galay in Muhaajiriin Tiradoodu dhantahay 68 Tahriibayaal ah waddankooda si nabad qab ah loogu celiyo waxayna dhammaantood ahaayeen Itoobiyaan.



3.2.3. Ka Ganacsiga Dadka iyo Ku Shaqaysiga Qasabka ah.

Hay'addu waxa ay wacyi-gelin u samaysaa Dadka la kulma tacaddiyada ka Ganacsiga Dadka sida ku Shaqeysiga iyo ka Ganacsiga socotada Ethiopianka ah ee ku dhex nool Somaliland.

Somaliland ka ganacsiga dadku wuxuu ka yahay dembi, Qaybta muhaajiriintu waxa ay u qabataa Dadka la kulma Tacadiyada ku Shaqaysiga adeegyo kala duwan kuwaas oo kala ah, adeeg la talin, gudbin adeeg Sharci iyado loo gudbinaayo Xafiiska Xuquuqul insaanka Somaliland.

Ka Ganacsiga dadku tusaale ahaan waa:

- Ku qasbidda Shaqo laga bixinayo Mushahar aad u yar ama aan gebi ahaanba Mushahar laga bixineyn.
- Ku qasbidda Dawarsiga ama dembi sameynta.



3.2.4 Ilaalinta Xuquuqda Caruurta Qaybta Wacyi-Gelinta Muhajiriinta.

Hay'adda Qaxoontiga Iyo Barakacayaasha Qaranka gaar ahaan Qaybta muhaajirinta (MRC) wuxu adeeg ilaalada Caruurta siiyey Sannadkan ugu danbeeyey tiro dhan 770 kiis oo caruura adeegyadan oo kala duwanaa isla markaana ay qaybtu ugu adeegto caruurta muhaajiriinta ee la socota waliidkooda iyo kuwa iskood usocdaba waxaana loo qabtay adeegyo kala duwan ee qaybtu qabato oo ah: -

Caruurta ilaalada gaarka ah u baahan ee qaybta muhaajirinta u xoogga saaro ayaa ah kuwan hoos ku xusan:-

➤ Ku Shaqaysi Caruurta.	➤ Bahdil (torture psychological abuse).
➤ Dayacaad ama Tuurid (Caruur Dayacan)	➤ Tuurid (abandon).
➤ Kufsi ama Galmo Sharci-daro ah.	➤ Caruurta iskood usocota (unaccompanied children).
➤ Jidh dil (physical abuse).	➤ Bahdil (torture psychological abuse).



Sawirada Daryeelka Carruurta

4. CUTUBKA AFRAAD: QAXOONTIGA



4. CUTUBKA AFRAAD: QAXOONTIGA

Hay'addu waxay u qabataa adeegyo kala duwan Dadka Qaxoontiga iyo Magangelyo doonka ku sugan Dalka JSL, waxaana kamid ah adeegyadan hoos kuxusan:-

1. Qaabbilaadda Dadka Qaxoontiga ah iyo Magangelyo-doonka.
2. Diiwangelinta Qaxoontiga iyo Magangelyo-doonka.
3. Ka jawaabista baahiyaha Dadka Qaxoontiga iyo Magangelyo-doonka.
4. U raadinta adeegyo Xal waara

Sababaha keenay Qaxoontiga iyo Magangelyo-doonka waxa ka mid ah Colaadhaha ka taagan Bariga Dhexe iyo Geeska Afrika kuwaas oo sababay in Dad badan oo magangelyo-doon iyo Qaxoonti ahi si toos ah (Primefacie refugees) u yimaadaan Dalka Jamhuuriyada Somaliland iyaga oo raadinaya nabad iyo nolol wanaagsan, sida ku cad xogta guud ee HQBQ Tirada Qaxoontiga iyo Magangelyo-doonka ee Waddanka ku sugan waa 15,548 oo Qof.

4.1 Diiwaangelinta Qaxoontiga iyo Magangelyo-doonka.

Sannadka 2021 waxa la Diiwaangeliyey 1,568 Qof oo u dhiganta 1,093 Qoys.

388 Qof oo ka mid ah dadka la diiwaangaliyey ayey dadoodu u dhaxaysaa 1 sano ilaa 17 sano, halka 454 Qof ay dumar yihiin sidoo kale Ragga la diiwaangaliyeyna ay tiradoodu dhan tahay 1,114 Qof.

- Abla-ablaynta lagu sameeyey Sannadkan Dadkii la diiwaangeliyey ayaa muu jinaysaa in 670 Qof oo noqonaysa 42.7% ay yihiin Dumar iyo Carruur, kuwaasi oo ah Dadka nugul ee loo yaqaan (Vulnerable group). Sidoo kale Dadka baa hiyaha gaarka ah qaba sida Dumar ka kalligood reer ka masuulka ah (Single Mother at risk), Qof weyn oo da'ah oo ka ligii nool (Elder person at risk), Carruur kaligood socda (unaccompanied and separated children) Dad xanuunno halis ahi hayaan iyo Dad Laxaad la' ayaa la diiwaangeliyey.



- Waxa Sannadkan Dacwadahoodii (cases) dib loogu furay 160 Qoys kuwaas Oo aan iman Xafiiska Diiwaangelinta markii ay socotay Barnaamijkii dib u-hubinta Qaxoontiga ku nool Somaliland (BIMS verification)kaasi oo socday intii u dhexaysay January ilaa August 2020. Dadkan ayaa la yimid Sababo macquul ah oo loogu Cudurdaari karo ka qeybgallid la'aantooda Barnaamijkii dib u- hubinta.



4.2.1 Kaadhahka Qaxoontiga iyo Shahaadooyinka Magangelyo doonka)

Bixinta Kaadhahka Qaxoontiga ayaa markii u horaysay laga bilaabay Somaliland dabayaaqadii Sannadkii 2020 taasoo socotay ilaa Bishii November 2021. Sidoo kale waxa la beddelay Shahaadooyinkii Muddadoodu dhacday ee Dadka Magangelyo-doonka ahi haysteen. Xogtan oo ku faahfaahsan Shaxdan hoose,

Breakdown by Region		
Region	ID cards	Certificates
MaroodiJeex	6897	5882
Awdal	44	120
Saxil	241	98
Togdheer	8	178
Total	7190	6278




Xogta Diiwaangelinta Qaxoontiga iyo Magangelyo doonka 2021

		NDRA Demographic Statistics From All REF_and_ASR 01/Jan/2021_To_31/12/2021																
	CoO	Case#	0-4		5-11			12-17			18-59			60+			Grand Total	
			F	M	0-4 Total	F	M	5-11 Total	F	M	12-17 Total	F	M	18-59 Total	F	M		60+ Total
Refugees	YEM	708	10	26	36	24	18	42	16	30	46	89	605	694	7	17	24	842
	SYR	126	26	38	64	20	26	46	15	18	33	80	91	171	1	1	2	316
	PAL	1	-	-	-	-	-	-	-	-	-	1	-	1	-	-	-	1
Asylum seekers	ETH	257	31	35	66	18	19	37	11	7	18	101	182	283	-	1	1	405
	OMN	0	-	-	-	-	-	-	-	-	-	2	2	-	-	-	-	2
	EGY	1	-	-	-	-	-	-	-	-	-	1	1	-	-	-	-	1
	LEB	0	-	-	-	-	-	-	-	-	-	1	1	-	-	-	-	1
Grand Total	1093	67	99	166	62	63	125	42	55	97	274	879	1153	8	19	27	1568	


Legal Status

Male
1114


Female
454



Legal Status
 ● Refugee
 ● Asylum-seeker



11a



4.2.2 Nidaamka Xog-keydiyaha Casriga ah ee ProGres Version 4

Qaybta Diiwaangelinta ee Waaxda Qaxoontiga ayaa hore u isticmaali jirtay nidaamka xog-keydinta ee loo yaqaano ProGres Version 3, kaasi oo ku Shaqayn jiray offline server. 29 kii Bishii December 2021 ayaa si rasmiya looga daahfuray Nidaamka ProGres Version 4 Xafiisyada Diiwaangelinta HQBQ ee Hargeysa iyo Berbera. Hirgelinta nidaamkan oo ah Online ayaa soo socday tan iyo January 2020 markaa oo Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranka JSL iyo Hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan Qaxoontigu ay ka bilaabmeen Dalka Barnaamijka dib-u-hubinta iyo xaqiijinta Dadka Qaxoontiga iyo Magangelyo-doonka ah ee Somaliland ku sugan. Markii Barnaamijka dib u hubinta Qaxoontiga iyo Magangelyo-doonku gabo-geboobay Bishii August ee Sannadkii 2020, waxa la bilaabay in xogta la helay loo kala saaro, Qoysaska iyo Shaqsiyaadka aan iman muddadii Barnaamijkaasi socday lagana soo qaado in aanay Dalka ku sugnayn isla markaana Dacwadahoodii la xidho. Arrinta ayaa ujeedooyinkeeda ay ka mid ahayd marka loo guurayo Xog-keydiye ProGres Version 4 in xogta loo rarayaa ay noqoto mid sugan oo ka turjumaysa Dadka Qaxoontiga iyo Magangelyo doonka ah ee Dalka ku sugan.

Jaantuska Qaabbilaada Cabashooyinka Qaxoontiga iyo Magangelyo-doonka. angelyo doonka ah ee Dalka ku sugan.

2	Waxbarsho-	41	23	NRC
3	Raaf (detension)	91	91	Ciidanka Socdaalka
4	Amaanka	4	3	LaamahaAmaanka
5	LacagahaCaawimada ah	372	206	UNHCR, PCC and Legal Clinic
6	Documentiyada lumay	97	97	QaybtaDiiwaangalinta
7	Dib u furista kiisaska	106	110	Qaybtadiiwaangalinta
9	Adeeg Sharci	16	13	Legal Clinic
10	Hoy (shelter)	7	5	Legal Clinic
Wadarta		767	577	

4.2.3 : Taakulada Dadka Qaxoontiga iyo Magangelyo-doonka

Waxda Qaxoontiga ayaa ka hawlgashay Sannadkan 2021 taakulooyinka ay Hay'adaha ka Shaqeeya Arrimaha Qaxoontiga ee ka hawlgala gudaha jamhuuriyada Somaliland ay gaadhsiiyeen dadka Qaxoontiga iyo magangelyo doonka ah ee dalka ku sugan.

4.2.4 Raashin Qaybintii Qaxoontiga Carabta ah ee ku sugan Dalka.

Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranka oo kaashanaysa Hay'ad da Helped Hands Aid ayaa waxa ay Deeq Raashin ah u qaybiyeen Toddoba boqol iyo Afartan qoys(740) oo ka mid ah Qoxoontiga Carabta ah ee ku sugan Magaalada Hargeysa.



Xuska Maalinta Qaxoontiga Aduunka

Maalinta Qaxoontiga Adduunka waa maalin caalami ah oo sannad walba 20 Juun ay si wada jir ah u soo qaban qaabiyaan HQBQ iyo Hay'adda UNCHR . Waxaa loogu talagalay in loogu dabaaldego oo lagu maamuuso Qaxoontiga ka kala yimid daafaha dunida. Maalinta waxaa markii ugu horreysay la aasaasay 20kii Juun 2001, iyada oo la aqoonsaday sannad-guuradii 50-aad ee Heshiiskii 1951 hadabba sanadkan 2021-20 june waxa Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranku ay xustay maalintaa caalamiga ah.



Sawiradda Maalinta Qaxoontiga Adduunka.

S/N	Magaca Mashruuca	Tirada ka Faa'iidaysta yaa-sha	Ujeeddada Mashruuca	Goobta	Gobolka	Goorta uu Dhammaaday
1	Diiwaangelin	1,568 Qof	Si in la sugo Qaxoontiga waddanka ku sugan	Hargeysa	M/ M/jeex	Dec 2021
2	kaalmada lacagta	4,550 Qof	in daryeelka Qaxoontiga la ilaaliyo	Hargeysa	M/ M/jeex	Dec 2021
3	Adeegga Caafimaadka	5,754 Qof	si Caafimaadka Qaxooti- ga kor loogu qaado	Hargeysa	M/ M/jeex	Dec 2021
4	Waxbarashada	2,037 Qof	si Aqoonta waxbarasho. Qaxoontiga kor loogu qaado	Hargeysa	M/ M/jeex	Dec 2021
5	Adeegyada Sharci	4,424 Qof	si Xuquuqda Qaxoontiga loo ilaaliyo	Hargeysa	M/ M/jeex	Dec 2021
6	Talo-siin	4,604 Qof	in la hago ama la sxo si ay Qaxooti-gu nolosha ula qabsadaan.	Hargeysa	M/ M/jeex	Dec 2021
7	Kiro Guri	2,72 Qof	si ay Qaxoontigu Hooy u helaan	Hargeysa	M/ M/jeex	Dec 2021
8	Tababarro & Meherado	1,38 Qof	si hab-nololeedka Qaxoontiga kor loogu qaado.	Hargeysa	M/ M/jeex	Dec 2021



Sawirada Adeegyada Caafimaad ee la siiyey Qaxoontiga iyo Magan-gelyodoonka

4.2.5 Kormeerka Xuduudaha ee ay samaysay Waaxda Qaxoontigu

Si loo ogaado Qulqulka Qaxoontiga iyo Magan-galyo-doonka ka soo gudbaaya Xuduudaha Somaliland Hay'addu waxay samaysay Sannadkan Laba Kormeer oo loogu baxay Degmooyinka Xuduudaha ku teedsan ee Dalka ee udhexeeya Dalka JSL iyo Dalka Itoobiya taariikhdu markii ay ahayd 24 August iyo 16 November 2021 iyadoo kaashanaysa Ciidanka laanta Socdaalka iyo Hay'adda UNHCR, kormeerkaasi oo lagu xaqiijinayaayey Dadka Xaduduudaha kasoo tallaabaya, Waxaana laga soo uruuriyey Macluumaad badan oo laga Diyaariyey warbixino hufan oo loo gudbiyey masuuliyiinta ay khusaysay.



4.2.6 Doorashooyinka Guddida Qaxoontiga ee HECCA iyo MENA

Sannadkan Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranku Waxay Qabatay Doorashada Guddiyada Qaxoontiga iyo Magangelyo-doonka kuwaas oo ka koobnaa laba Guddi:-

1. Guddiga Qaxoontiga Carabta
2. Guddiga Qaxoontiga iyo Magangelyo-doonka Itoobiyaanka ah.

Guddiyadan oo labadii sanaba mar la doorto waxay ka kooban tahay Guddi waliba 11 Xubnood oo ay ka mid yihiin Guddoomiye, G/xigeen iyo Xoghaye kuwaasi oo metelaya Bulshada Qaxoontiga iyo Magangelyo-doonka ah ee ku nool Somaliland waxaanay si dhaw ula Shaqeeyaan HQBQ.



4.2.7 Shirka Hay'adaha Dawladda ee wada Shaqeynta la leh HQBQ:

Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranka (HQBQ) ayaa qabata shir ay isugu yimaadaan laamaha Dawladda ee ka wada Shaqeeya Arrimaha Qaxoontiga sida Ciidanka Ammaanka, Ciidanka ilaalada xeebaha, Ciidanka laanta socdaalka, Wasaaradda Caddaaladda, Hay'adda Xuquuqal Insaanka Qaranka iyo Hay'adda Qaramada midoobay u qaabilsan Arrimaha Qaxoontiga ee UNHCR. Shirka ayaa lagaga hadlaa mawduucyada taagan ee khuseeya Arrimaha Qaxoontiga.



28kii June iyo 10 November ee 2021 ayaa shirkan lagu qabtay HQBQ. Qodobada lagaga hadlay ayaa waxa ka mid ahaa;

1. HQBQ ayaa ka warbixisay tirada guud ee Qaxoontiga iyo Magangelyo doonka Dalka jooga iyo Qorshaha xoojinta adeegyada ay helaan.
2. Joogtaynta UNHCR iyo mashaariicaha ay siiso Hay'adaha (LNGOs/INGOs) iyo waxqabadkooda.
3. Xaaladda guud ee Amni, Dhaqaale iyo Bulsho ee Dadka Qaxoontiga ah
4. Su'aalo toos ah oo la waydiiyey NDRA iyo UNHCR oo ku saabsan waxqabadyadooda.

4.2.8. Diyaarintii Xeerka Qaxoontiga JSL.

Xeerka Qaxoontiga iyo Magangelyo doonka oo curintiisu soo bilaabantay Sannadkii 2018 waxa uu soomaray marxalado kala duwan kaas oo kulano iyo wadatashiyo ballaadhan oo dhinacyo badan taabanaya oo lagaga qayb geliyay dhammaan Hay'adaha iyo Wasaaraddaha uu aadka u sii khuseeyo sida:

- Wasaaradda Dastuurka iyo xidhiidh ka Goleyaasha.
- Hay'adda xuquuqul insaanka Qaranka
- Wasaaradda Caddaaladda
- Wasaaradda Arrimaha Guddaha
- Ciidanka Socdaalka iyo ilaalinta xuduudaha
- Ciidanka ilaalada Xeebaha
- Ciidanka Booliska

Waxa kale oo lagala tashaday khabiirro dhinaca sharciga ah oo u badan xafiiska Garyaqaanka guud ee JSL waxaana xeerkan saldhig u ah Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland iyo xeerarka caalamiga ah ee la xidhiidha ilaalinta iyo dhawrista Xuquuqda Qaxoontiga iyo Magangelyo doonka. Qaxoontiga iyo magangelyo doonka.

4.2.9. Faa'iidooyinka sharcigani uu u leeyahay Qaranka.

1. In la helo Hannaann sharci oo lagu maamulo Arrimaha Qaxoontiga iyo Magangeliyo doonka si waafaqsan xeerarka Dalka Jamhuuriyada Somaliland iyo xeerarka caalamiga ah ee Arrimaha Qaxoontiga.
2. Helitaanka sharcigan waxa uu sugayaa nidaamka ay Somaliland go'aan uga gaadhi karto cidda u qalanta in ay Qaxoontinimo ku joogto Somaliland.
3. Waxa la helayaa nidaam sharci oo ilaaliya xuquuqda iyo waajibaadka Qaxoontiga iyo Magangelyo-doonka ku sugan Jamhuuriyada Somaliland.
4. Waxa uu kor u qaadayaa wadaShaqaynta iyo iskaashiga ka dhaxeeya Hay'adaha ku hawllan Arrimaha Qaxoontiga sida kuwa Dawliga, maxaliga , iyo caalamiga ahba.

DHAMMAAD



JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XM/249-16/012018

Taar: 03/01/2018

Xeer Madaxweyne Lr. 02/122017

Aasaasidda Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha

- Markaan Arkay:** Qodobbada 90aad iyo 113aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland iyo Qodobka 63(3), ee Xeerka Kala Xadaynta Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'adaha Madaxa Bannaan Xeer Lr. 71/2015;
- Markaan Arkay:** Baahida loo qabo xog-ogaal u noqoshada dadka qaxootiga ah ee Reer Somaliland, ee ku kala sugan qaaradaha dunida, ee aan ka helin deganaansho sharci wadamada ay Qaxootiga ku yihiin, si loo xaqiijiyo in si sharaf iyo nabadgelyo ah, dib loogu soo celiyo dalka;
- Markaan Arkay:** In ay muhiim tahay in la abuurro nidaam iyo qorsheyaal fududaynaya dib-udejinta qaxootiga soo noqonaya, iyada oo lala kaashanayo hay'adaha kale ee dawladda, kuwa maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ahba;
- Markaan Arkay:** Muhiimada ay leedahay in la xaqiijiyo daryeelka muwaadiniinta ku barakaca dalka gudihiisa, iyadoo loo abuurayo nidaam dib u dejineed iyo is-dhexgal, si loo taakuleeyo, loona gacan qabto muwaadiniinta barakacayaasha ah;
- Markaan Arkay:** in ay muhiim tahay in la dhiso nidaam lagu maamulo dadka barakacayaasha ah iyo goobaha dib-udejinta, sidoo kalana diiwaangaliya, kana war-bixiya

muwaadiniinta barakacayaasha ah iyo xaaladohooga nololeed, si loogu diyaariyo adeegyada lagama maarmaanka ah;

Markaan Tixgaliyay: in ay lagama-maarmaan tahay in la middeeyo adeegyada barakacayaasha gudaha iyo arrimaha Qaxoontiga ee xukuumadda iyo hay'adaha kale ee maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ahba;

Markaan Arkay: In maamulka hawlaha barakacayaasha iyo Qaxoontiga Qaranku ku habboon tahay hay'ad gaar ah oo dawladeed oo aan ahayn wasaarad.

Waxaan Go'aamiyey:

Qodobka 1aad: Dhismaha Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranka

- 1) Waxa halkan lagu dhisay Hay'adda Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranka, oo yeelanaysa jiritaan Qaanuuni ah, isla markaana u madax-bannaan hawlaheeda shaqo iyo maaliyadeed, iyadoo u gudanaysa xilkeeda si waafaqsan dastuurka, xeerka dhismaha hay'adda iyo xeerarka iyo siyaasadaha dalka.
- 2) Xarunta dhexe ee Hay'addu waxay noqonaysaa Caasimada Hargeisa, waxayna xarumo ka furan kartaa gobollada dalka.

Qodobka 2aad: Xilka iyo Waajibaadka Hay'adda

- 1) Xilkii iyo waajibaadkii Wasaaraddii hore ee Dib-u-dejinta, waxa loo wareejiyay hay'adda cusub ee Qaxoontiga iyo Barakacayaasha Qaranka.
- 2) Iyada oo aan waxba loo dhimayn farqada sare ee qodobkan, Xilka iyo waaajibaadka hay'adda waxa ka mid ah:
 - a) In ay curiso xeerarka, siyaasadaha, qorshayaasha iyo mashaariicda la xidhiidha barakacayaasha iyo Qaxoontiga soo noq-noqonaya, iyada oo la kaashanaysa hay'adaha dawladda iyo hay'adaha kale ee khuseeya.
 - b) In ay abuurto, dhaqangalisana qorshayaasha iyo mashaariicda dib loogu dejinayo barakacayaasha iyo Qaxoontiga soo noq-noqonaya, si dib loogu dhiso noloshu barakacayaasha iyo Qaxoontiga, looguna helo xal waara.

- c) In ay hirgaliso mashaariicda iyo adeegyada aasaasiga u ah dib u dejinta barakacayaasha, sida nabadgelayada, biyaha, caafimaadka, waxbarshada iwm.
- d) In ay xidhiidhiso kaalmooyinka iyo deeqaha barakacayaasha ee hay'adaha dawladda, kuwa maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ahba.
- e) In ay qiimayso, sidoo kalana dabagal ku samayso mashaariicda dib u dejinta iyo kaalmooyinka loo fidiyo muwaadiniinta Qaxoontiga ah ee dalka ku soo laabanaya, iyada oo la raacayo heshiisyada iyo xeerarka dalka ee khuseeya.
- f) In ay ka hawl-gaasho taakuulaynta iyo gacan qabashada dadka barakacayaasha ah.
- g) In ay ka hawl-gasho dib u dejinta qoxoontiga soo noq-noqonaya iyo barakacayaasha.
- h) In ay diiwaangaliso Qaxoontiga ajaanibka ah ee dalka ku sugan, iyada oo la kaashanaysa ciidanka socdaalka iyo hay'adaha kale ee la xidhiidha, iyada oo raacaysa xeerarka iyo siyaasadaha dalka. Iyo,
- i) Xilka iyo waajibaadka kale ee ay siiyaan xeerarka dalku.

Qodobka 3aad:Maamulka iyo Qaab-dhismeedka

- 1) Hay'addu waxay yeelanaysaa Guddoomiye iyo Guddoomiye ku-xigeen, uu soo magacaabo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, isla markaana uu xilka ka qaadi karo.
- 2) Qaab-dhismeedka iyo awoodaha Hay'adda, xilka iyo waajibaadka Guddoomiyaha, Ku-xigeenka Guddoomiyaha, iyo waxyaabaha kale ee lagama-maarmaanka u ah, waxa lagu faah-faahin doonaa xeerka dhismaha Hay'adda, si waafaqsan Qodobka 122aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh



Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland






REPUBLIC OF



Published by Directorate of Colonial Surveys D.C.S. 1/2/31.
1/1,500/4/48 S.P.C.

SOMALILAND



Compiled and Drawn by Directorate of Colonial Surveys
Photolithographed and Printed by War Office, 1948.



BUUGGA WAXQABADKA HAY'ADDA QAXOONTIGA & BARAKACAYAASHA QARANKA SOMALILAND 2021

لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ مُحَمَّدٌ رَسُوْلُهُ



JAMHUURIYADDA SOMALILAND



NATIONAL DISPLACEMENT & REFUGEE AGENCY



WAXQABADKA

HAY'ADDA QAXOONTIGA IYO
BARAKACAYAASHA QARANKA

Sannadka 4^{aad}

2021

BUUGAN WAXA LA DAABACAY
DECEMBER 2021

www.ndra.govsomaliland.org